Qaaxada Hurudda

Latent Tuberculosis

(Somali)

Waa maxay cudurka loo yaqaano TB ama Qaaxada?

Cudurka qaaxada ee afka qalaad loogu yeero TB (tiibey) wuxuu allaba ku dhaca sambbabbada. Cudurka tiibeyda ama qaaxada waxaa uu saameyn ku yeelan kara qaybaha kale ee jidhka sida lafaha iyo maskaxda.

Qaaxadu waxay ka timaadda jermis (germs). Marka uu qofka qabo cudurka qaaaxada ee sambbabbada ku dhacey uu qufaco ama hindiso, wuxuu hawada ku siidaaya jermiska qaaxada. Waxaa dhici karta in jermiskaas hawada ku jira uu qof kale qaato marka uu qofku ku neefsado hawadaas jermiskaas sida. Jermiskaas marka uu jirka dhexgalo wuxuu naafeeya sambabada iyo qaybaha kale ee jirdhka, dabeetana qofku wuxuu noqda bukaan. Cudurkan aan ka soo sheekeyne waxaa si rasmi ah loogu yaqaana **cudurka (TB) tiibeyda** ama qaaaxada caadiga ah.

Cudurka tiibeyda waa la daaweyn kara.

Waa maxay cudurka loo yaqaano tiibeyda ama qaaxada hurudda (latent)?

Tiibeyda Hurudda ee afka qalaad loogu yaqaano **latent TB** uu ka duwan yahay **cudurka tiibeyda** caadiga ah ee sambbabbada gala.

Tiibeyda hurudda wuxuu kaga duwan yahay qaaxada caadiga in jeermiska tiibeyda uu yahay mid hurudda oo aan firfircooneyna. Inta uu jeermisku huruddo qofka uu kujiro jidhkiisa waxba kama dareemo caafimaadkiisa. Dadka qaba tiibeyda hurudda ma ahaa dad bukkaan ah, mana qaadsiin karaan jermiska jidhkooda ku jira dad kale.

Maxay yihin calaamadaha lagu garto tiibeyda hurudda?

Malaha caalamadaha bukaanka. Waxaa lagu ogaani kara in qofku qabo cududrka qaaxada hurudda marka diirkiisa baaritaan lagu sameeyo.

Dadka qaba cudurka qaaxada hurudda ma'ahaa dad bukkaan ah.

Dadka qaba cudurka tiibeyda hurudda waa dad fiiyow

Mana qaadsiin karan cudurka dadkale

Su'aal? Haddii aanan bukin maxay lagamaarman u tahay in la iiga daaweeyo tiibeyda hurudda?

Daweynta waxaa sababeya in ay suurtagal tahay in maalin maalmaha ka mid ah (bilooyin ama sanado ka dib) uu jeermiska tiibeyda uu soo noolado. Mar hadduu jermisku huruddada ka soo kaco wuxuu awod u leeyahay in uu cudurka tiibeyda ku rido sambbabbada iyo jidhka intiisa kale. Marka uu cudurka tiibeyda hurudda qaaxo kugu noqdo, waxaad noqoneysa qof aad u jiran, waxaad markaas suurtagal ah in aad dadka kale aan qaadsiisid sida qoyskaga ama mushtamaca inteeda kale.

Ilmaha iyo carrurta qaba tiibeyda hurudda waxay u nugulyihin in ay qaadan qaaxada caadiga ah, dabeetana ay bukoodan.

Haddii la ogaado in aad qabtid tiibeyda hurudda, wuxuu dakhtarku kugula talin karaa in laga daaweyo cudurka.

In kasta oo aad isleedahay waad caafimaad qabta, haddana waxay dantu ku jirta in laga daaweeyo cudurka tiibeyda hurudda si looga hortago halista ka imaaneysa marku uu jermisku soo noolado.

Dakhatarka aayaa kaala tashanayaa siiyaabaha lagaaga daaweeynayo tiibeyda hurudda.

Sidee loo daaweeya cudurka tiibeyda hurudda?

La dagaalanka tiibeyda hurudda waxay ku xirantahay da'da qofku jiro iyo haddi ay jiiran caafimad darro kale.

CARURTA: Haddii uu qofku yahay ilmo ama carrur waxaa baaritaan ku sameynaaya dakhtarka carrurta (Paediatrician). Dakhtarka carrurta ayaa go'aan ka gaaraya sida ugu habbon ee ilmaha looga daaweyn karo cudurkaas.

QOF-WEYN: Huddu qofku yahay qof-weyn waxaa arkaaya dakhtar ku takhasusey la daaweynta cudurka qaaxada hurudda (Latent). Dakhtarka ayaa qiimeynaaya daawada adiga kuu wanaagsan.

Waxaa laga yaaba in dhakhtarku in uu daawooyin kuu qorhseeyo. Waxaa lagaaga baahan yahay in aad daawooyinka qaadato muddo dhawr bilood ah. Muddada aad daawada qaadaneysid waxay ku xiran tahay, nooca daawada laguu qoro. Inta ay daawadu kuu socoto waxaa bilwaliba ku arkaaya kaalkaaliye-caafimaad iyo dakhtarka. In kasta oo laga yaabo in aad is-leedahay caafimaadkaagu uu wanaagsan yahay, haddana waxaa lagaa rabaa in aad daawada si joogta ah maalin-waliba aad u qaadatid ama sida uu dakhatarku kuugu sheego.

Haddi aadan si joogta ah u qaadanin daawada, waxaa surtagal ah in jermiska qaaxada hurudda ee jidhka ku jira in uu dilmi-waayo.

Haddii dakhatarku uusan kuu qorin daawooyin: Dakhtarka iyo kaalkaaliyaha waxay kuu sheegayaan astaamaha bilawga ah ee lagu garto cudurka qaaxada caadiga ah. Haddii aad istiraadid waxaad leedahay astaamahaas oo kale si deg deg ah u arag dhatarkaaga ama kaalkaaliyaha.

Waa maxay daawooyinka loo isticmaalo tiibeyda hurudda?

Qaaxada hurudda waxaa aalaba lagu daaweeya daawada la yirado Isoniazid ama INH. Haseyeeshe, mararka qaarkood waxaa la isticimaala dawooyin kuwaas ka duwan. Daawadu waxay dishaa jermiska qaaxada hurudda ee jidhka ku jira.

Haddi lagu siiyo daawada INH, waxaa loo baahan yahay in aad maalin-waliba aad qaadatid daawadaas inta u dhexeysa lix (6) ilaa sagaal (9) bilood. Waxaa lagu fari kara in aad daawada qaadatid iyada oo calooshadu ay maran-tahay, tusaale ahaan:

- *Hal saac ka hor inta aadan quraacan*

AMA

- *Laba saacado ka dib marka aad casheysid.*

Waxaa laga yaaba in uu dakhtarku kuu qoro daawada la yiraado pyridoxine oo ah fiitamin. Fiitamiinku wuxuu dadka waa-weyn ka caawinaaya sidii ay uga hortegi lahaayeen waxyaabaha qofka kaga yimaadda isticmaalka daawada INH.

Haddii aad ka welwelsantahay cudurka tiibeyda hurudda ama daaweynteeda ama waxyaabaha kaaga imani kara isticmaalka daawooyinka, waxaa kala arrinsata dakhtarkaaga ama kaal-kaaliyaha caafimaadka.

Waa maxay waxyaabaha kaaga imaan kara isticmaalka daawada INH?

Daawada INH waxay mararka qaarkood qofka da'da ah (dhalin yaro iyo wayeelba) u geysan karta dhibaatooyinka hoos ku qoran. Inta badan laguma arko caaruurta waxyaabahaas mar mar dhif ah mooye.

Waxaayabaha laga la kulmo isticmaalka INH waxaa ka mid ah:

- *La'labo, matag iyo calool xanuun*
- *Iyada oo uu jidhkaagu wax kasoo yaacan ama uu jirdhku ku cuncuno*
- *Adoo ay gacmaha iyo luguhuu ku kaboobiyoodan*
- *Cudurka hepatitis ama cagaarshowga (Beerka oo barar fuulo). Cudurka cagaarshowga waxaa lagu garta in jidhkaagu (maqaarka) cagaar noqdo, indhaha oo cagar isu beddela iyo kaadidaada oo madowbada.*

Dakhtarka iyo kaalkaaliyaha-caafimaadka ayaa had iyo jeer baaritan joogta ah ku sameynaaya beerkaga si ay ula socdan xaaladdiisa.

Haddii aad isku aragtid waxyaabaha kor ku xusan, waxaad joojisa isticmaalka daawada, waxaadna isla markaas telefoon udirta dhakhtarkaga ama kaalakaaliyaha.

Haddii aad qabtid tiibeyda hurudda, waxaad xasuusata....

- *In aadan qabin cudurka tiibeyda nool*
- *Qof kale inaadan qaadsiin karin*
- *Inaad u baahan tahay daaweyn in kasta oo aadan jiiraneyn oo aad is leedahay waad caafimaad qabta.*

Haddii aad u baahatid warara dheerad ah waxaa halkan kala xirrirta dakhtarka ama kaalkaaliyaha ku shaqo leh cudurka qaaxada:

(TB doctor / nurse details here)

MINISTRY OF HEALTH
MANATŪ HAUORA

Ministry of Health, June 2003. Code: 1434 SOM